

Datum

2017-10-03

Somaliska

Faktablad för arbetssökande -
Bidrag till hjälpmedel på arbetsplatsen

Kallmo dhaqaale oo ku aaddan qalab wax caawiya oo goobta shaqada ah

Waxaad kaalmo dhaqaale u heli kartaa qalab wax caawiya haddii aad qabtid hoos u dhac awoodeed oo xagga shaqada ah oo ay cuuryaannimo sabab u tahay. Qalabka wax caawiya wuxuu booskiisa buuxin karaa hoos u dhaca awoodeed ee xagga shaqada, wuxuuna kuu fududeynayaa in aad shaqo heshid ama heysatid, in aad shirkad sameysato, in aad ka qeyb qaadatid barnaamij la xiriira siyaasadda suuqa shaqada ama in aad ka qeyb qaadatid jiheynta nolosha shaqada ee dugsiga ah.

Maxaan kaalmo u qaadan karaa?

Waxaad kaalmo dhaqaale u heli kartaa in aad soo gadatid ama soo kireysatid qalab shaqo oo wax caawiya oo shakhsi ahaaneed oo goobta shaqada wax kuugu fududeynaya. Qalabka wax caawiya wuxuu booskiisa buuxinayaa hoos u dhacaaga awoodeed ee xagga shaqada ah. Shaqa bixiyuhu wuxuu sidoo kale heli karaa kaalmo dhaqaale oo ku aaddan qalab shaqo oo wax caawiya ama haddii ay jirto baahi ah in goobta ama qalabka shaqada la waafajiyo baahida qofka shaqaalaha ah.

Qalab wax caawiya kaalmo dhaqaale ma u heli karaa?

Kaalmo dhaqaale waad heli kartaa haddii aad qalab wax caawiya baahi u qabtid

- adiga oo shaqaale ah
- adiga oo shirkadle ah ama si xur ah xirfad ugu shaqeysta
- si aad uga qeyb qaadan kartid barnaamij la xiriira siyasadda suuqa shaqada ama jiheynta wax qabad la xiriirta oo xagga nolosha shaqada ah.

Imisa ayaan kaalmo dhaqaale ahaan u heli karo?

Waxaad kaalmo dhaqaale ahaan u heli kartaa ilaa iyo 100 000 kr sannadkiiba. Haddii ay jirto sabab tixgelin gaara leh waxaad heli kartaa lacag intaas ka sii badan. Shaqa bixiyuhu sidoo kale wuxuu kaalmo dhaqaale ahaan u heli karyaa ilaaiyo 100 000 kr sannadiiba.

Datum

2017-10-03

Somaliska

Faktablad för arbetsgivare -
Bidrag till hjälpmedel på arbetsplatsen

Goormeen kaalmo dhaqaale heli karaa?

Waxaad kaalmo dhaqaale heli kartaa haddii aad baahi soo sheegatid laba iyo tobanka bilood ee ugu horreysa ee shaqada. Markaas ka dib Qasnadda ceymiska ayaa leh mas'uuliyadda gaarka ah oo ku aaddan waxyaabaha waxa caawiya ee shaqada.

Haddii aad si la dhawray uga shaqeysid hey'ad dowladeed ama aad kaalmo dhaqaale oo gaar ah oo xagga mushaarka ah ku shaqaaleysantahay waxaad kaalmo dhaqaale xitaa u heleysaa baahida waqti dambe oo shaqada ka mid ah soo baxda.

Sideen sameynaa?

La xiriir Xafiiska xiriirka shaqada haddii aad qabti baahi qalab wax caawiya ama goob shaqo baahidaada wafajinteeda. Xafiiska xiriirka shaqadu wuxuu markaas sameynayaa qiimeyn si uu u eego haddii aad kaalmo dhaqaale heli kartid. Ogaw waa in ay tahay in kaalmada dhaqaale la oggolaado inta aadan dalban qalab wax caawiya ama aadan saxiixin heshiis soo kireysasho. Wax lacag ah ma bixin karno haddii aan la oggolaannin.

Sidee kaalmada lacageed loo bixinayaa?

Xafiiska xiriirka shaqadu wuxuu lacagta kaalmada ah u soo shubayaa adigaaga u baahan qalabka wax caawiya. Haddii aadan fursad u heysan in aad warqadda qaan sheegadka bixisid inta aadan kaalmada lacageed helin Xafiiska xiriirka shaqada ayaa warqadda qaan sheegadka kaa bixin kara.

Maxaa dhacaya haddii aanan qalabka wax caawinta u isticmaalin sidii aannu ku heshiinnay?

Waxaa khasab ah in aad dib u soo celisid kaalmadii lacageed ee lagu soo shubay haddii aad bixisay macluumaad aan runta waafaqsaneyn ama aadan qalabka wax caawinta u isticmaalin sidii aannu ku heshiinnay. Haddii ay sababo gaar ah jiraan wuxuu Xafiiska xiriirka shaqadu go'aan ku gaari karaa in aadan u baahnaan in aad kaalmada dhaqaale soo megtid.

Maxaa dhacaya haddii aan joojiyo shaqada ama tababarka shaqada ee goobta kaalmada leygu siiyay?

Qalabka wax caawinta waad heysaneysaa haddii aad shaqada joojisid haddii aad u isticmaashay sidii loogu tala galay. Waxaad u qaadan kartaa goob shaqo oo cusub.

Datum

2017-10-03

Somaliska

Faktablad för arbetsgivare -
Bidrag till hjälpmedel på arbetsplatsen

Yaa leh mas'uuliyadda qalabka wax caawiya?

Marka aad heshid kaalmo lacageed oo qalab wax caawin loogu tala galay waa adiga cidda waxa iska leh oo mas'uulka ka ah in aad gelisid ceymisyada laga yaabo in loo baahanyahay. Waxaad sidoo kale mas'uul ka tahay dayac tirka, koontaroolidda iyo canshuuraha laga yaabo in laga bixiyo. Laakiinse waxaad naga heli kartaa kaalmo dhaqaale haddii qalab wax caawiya loo baahanyahay in dib loo hagaajiyo.

Sharciyo

Xeerka (SFS 2017:462) ee ku aaddan dadaallo gaar ah oo loogu tala galay dadka qaba cuuryaannimo keeneysa awood shaqo oo hooseysa

Xeerka (SFS 2000:628) ee ku aaddan hawlaha la xiriira siyaasadda suuqa shaqada

Ma dooneysaa in aad wax dheeraad ah ogaatid?

Naga soo wac 0771-416 416 haddii aad daneyneysid, aadna dooneysid in aad wax dheeraad ah ogaatid. Waxaad sidoo kale raadsan kartaa xafiiska xiriirka shaqada ee kuugu dhaw ama gal barta intarneetka ee arbetsformedlingen.se.